


# Qaab-dhismeedka Go'aan-qaadashada Miisaaniyadda 2025

## QOSHAYNTA | TAAGEERO

## GO'AAN-QAADASHADA

KA QEYBQAADASHADA BARNAAMIJKA



\* Ujeeddada Ka-Qaybgalinta: In lala shaqeeyo ardayda, qoysaska, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada inta uu socdo mashruuca oo dhan si loo hubiyo in si joogto ah loo fahmo, loona tixgeliyo, walaacooda iyo himilooyinkooda. Qalabyada ilaa iyo hadda laga faa'iideystay: ra'yi-uruurinta bulshada, kulamada ka-qaybgalka miisaaniyadda, taleefanno la wacay qoysaska, foomka talo-bixinta.

Shaxda kor ku xusan waxay sharraxayaa qaab-dhismeedka go'aan-qaadashada miisaaniyadda ee SPPS 2025 (FY25) iyo habka qorshaynta.

**Ansixinta Miisaaniyadda:** Guddiga Waxbarashada, ayaa ugu dambeyn mas'uul ka ah ansixinta miisaaniyadda kama dambaysta ah ee June, 2024.

**Kafaala-qaadaha Fulinta:** waa Wakiilka ugu sarreeya Degmada -- oo ah Isu Duwaha Guud Gothard -- kaas oo hagaya Mashruuca Kafaalaqaadka si loo hoggaansho geeddi-socodka qorshaynta oo loona horumariyo miisaaniyad isku dheellitiran oo ah sannad-maaliyadeedka 2025 ah taasoo buuxinaysa waxyaalaha mudnaanta u leh waxbarashada iyo baahiyaha ardaydeenna iyo bulshadeenna, iyadoo isla markaana la xaqiijinayo natiijooyinka ardayda.

**Kafaale-Qaadaha Mashruuca:** waa shaqaalaha Degmada ee muhiimka ah ee kormeeraya hannaanka qorshaynta guud ee mashruuca kaasoo metela Isu Duwaha Guud Gothard (Kafaale-Qaadaha Fulinta). Kafaale-Qaadayaasha Mashruuca ayaa sidoo kale mas'uul ka ah bixinta jihataynta socoto ee joogtada ah ee la siinayo Kooxda Mashruuca si loo xaqiijiyo in la buuxiyo yoolalka qorshaynta iyo jadwalka degsan. Kafaala-qaadayaasha Mashruuca ayaa sidoo kale raadraacaya oo wixii horumar ah u sheego daneeyayaasha sida Hoggaanka Degmada, shaqaalaha, qoysaska, ardayda, saaxiibbada degmada, iyo sharci-dejiyayaasha.

**Kooxda Hoggaanka:** waa Kooxda Fulinta ee Hoggaanka Sare ee Degmada (SELT) oo kula taliya Isu Duwaha Guud Gothard talooyinka ay soo saareen Kooxda Mashruuca si loo gaaro go'aamo war-geliyo qorshaha kama dambaysta ah.

**La-taliyayaasha Dhanka Mawduuca:** waa Guddiga La-talinta Maaliyadda ee Degmada (FAC) kaasoo la taliyo Madaxa Guud ee Maaliyadda. Doorkoodu waa in la xaqiijiyo in talooyinka maaliyadeed ay ku salaysan yihiin go'aan qaadasho maaliyadeed oo wanaagsan kuwaasoo la jaanqaadaya mudnaanta istiraatiijiyadeed ee Dugsiyada Saint Paul Public Schools.

**Maareeyaha Mashruuca:** Waa qofka mas'uulka ka ah isku dubaridka iyo maareynta hannaanka qorshaynta maalinlaha ah iyo miisaaniyadda mashruuca kaasoo ku hadlaya magaca Kafaala-Qaadaha Mashruuca.

**Kooxda Mashruuca:** Shaqaalaha gudaha ee bixiya taageerada geeddi-socodka qorshaynta iyagoo adeegsanayo falanqaynta xogaha iyo isgaarsiin istiraatiiji ah. Waxay si joogto ah ula kulmaan Isu Duwaha Guud, kooxda hoggaanka ee SELT, Kafaala-qaadayaasha Mashruuca iyo Maareeyaha Mashruuca si ay u bixiyaan talooyin joogto ah oo ku saabsan qorshaynta mashruuca miisaaniyadda iyo tilmaamaha muhiimka ah kuwaasoo wargeliyo talooyinka la soo jeedinayo.

**Taageerada Gudaha iyo Talo-bixinta:** Waa shaqaalaha gudaha ee maamulayaasha iskoollada iyo hoggaamiyayaasha waaxaha kuwaasoo bixiya talobixin iyo aqoon ah dhanka mawduuca si ay gacan uga geystaan hagidda geeddi-socodka go'aan-qaadashada.

## Xubnaha Kooxda Mashruuca:

1. Jackie Turner, Madaxa Fulinta Hawlaha, Kafaale-Qaadaha Labaad ee Mashruuca
2. Tom Sager, Madaxa Fulinta ee Maaliyadda, Kafaale-Qaadaha Labaad ee Mashruuca
3. Xubnaha guud:
  - Stacey Gray Akyea, Madaxa Fulinta ee Xafiiska Fursadaha loo Siman yahay, Istaraatiijiyadda iyo Hal-abuurka
  - Leah Corey, Agaasimaha, Xafiiska Hal-abuurka
  - Maggie Bruecken, Maareeyaha Mashruuca, Xafiiska Hal-abuurka
  - Erica Wacker, Agaasime, Xafiiska Isgaarsiinta
  - Jessica Larson, Khabiirka Isgaarsiinta, Xafiiska Isgaarsiinta
  - Andrew Adams, Agaasimaha Fulinta, Xafiiska Maaliyadda
  - Chay Yang, Maareeyaha Miisaaniyadda iyo Saadaasha, Xafiiska Maaliyadda
  - Dana Abrams, Agaasime, Xafiiska Iskaashiga la-Shaqeynta Qoyska iyo Bulshada
  - Pablo Matamoros, Kaaliyaha Agaasime, Xafiiska Iskaashiga la-Shaqeynta Qoyska iyo Bulshada
  - Patty Reyes, Isuduwaha Xafiiska la Shaqeynta Qoyska, Xafiiska Iskaashiga la-Shaqeynta Qoyska iyo Bulshada
  - Addison Smith, Qiimeeyaha Barnaamijka, Xafiiska Cilmi-baarista, Qiimaynta iyo Imtixaanidda
  - Gregory Childs, Maareeyaha Barnaamijka Title I, Xafiiska Barnaamijyada Title I ee Federaalka
  - Vicki Bohling Philippi, Isuduwaha Iskaashiga Qoyska iyo Iskoollada, Xafiiska Barnaamijyada Federaalka